

Somali

Pre K Boston

Universal Pre-Kindergarten (UPK), waa barnaamij ay maalgeliso Magaalada Boston, waxayna balan qaadysaa in lagu soo bandhigo doorashooyin **tayo sare leh oo bilaasha ah** caruurta **sadex iyo afar jirka ah ee** Boston. Pre-K waa maalin dugsiyeedka 6.5 saac 180 maalmood sanadkii.

Qaabka UPK ee Boston wuxuu bixiyaa **isla barnaamij tayo sare leh oo leh goobo kala duwan:**



Dugsiyada
Dadweynaha
Boston



Dugsiyada
Madaxa banaan



Daryeelka
Carruurta
Qoyska



Xarumaha
Bulshada

Pre-K oo tayo sare leh macnaheedu waa:

- Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) UPK **waa ka sarreeya heerarka qaranka.**
- Dhammaan macalimiinta Pre-K **waxay haystaan shahaado waxbarashada caruurnimada hore** waxayna diyaar u yihii inay wax ku **dhigaan goobaha fasalka si ay u taageeraan ardayda asal kasta** iyo baahi kasta.
- Macallimiintu waxay helaan **horumar xirfadeed oo socda** sanadka oo dhan si ay kor ugu qaadaan waxbarashadooda.
- Tababarayaal khabiiro ah ayaa **taageero joogto ah siiya macalimiinta.**
- Ardaydu waxay wax ka bartaan **Dugsiyada Dadweynaha Boston Focus on Pre-K iyo manhajka blocks, kuwaas oo ah moodooyinka qaranka ee waxbarashada caruurnimada hore.**
- Dhammaan jawiga fasalku waa **kuwo da'da ku habboon oo dhaqan ahaan ka jawaabaya.**

Baro Buug-gacmeedKa QoysKa ee UPK
adoo isticmaalaya QR Code



Somali

Pre K Boston

Yaa xaq u leh?

Ilmo kasta oo degan Magaalada Boston oo noqon doona saddex ama afar jir September 1-deeda ee sannad dugsiyedka soo socda.

Sideen u dalban karaa?

Si aad u qorto ardaygaaga UPK mid ka mid ah bixiyayaasha bulshada iyo dugsiyada madaxa banaan, waxaan ku waydiisanaynaa inaad booqato boggayaga shabakada BPS (www.bostonpublicschools.org/upk) oo dhagsii badhanka "Codso Hadda". Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Kooxda Diiwaangelinta UPK upk@bostonpublicschools.org, ama naga soo wac 617-635-1507. Turjumaada waxa la bixiyaa marka la cadsado Codsiyada waxaa loo tixgaliyaa si isdaba joog ah ilaa dhammaan kuraasta laga buuxiyo dhammaan bixiyeyaasha.

Waa maxay sababta diiwaangelinta UPK uga duwan tahay diiwaangelinta BPS?

Diiwangelinta Pre-K ee fasallada Dugsiyada Dadweynaha Boston waxa loo maraa Adeegyada Soo dhawaynta ee BPS, oo maamula diiwaangelinta dugsiga. Sababtoo ah bixiyayaasha bulshada iyo BPS waa hay'ado gaar ah, nidaam isdiiwaangelin gaar ah ayaa la sameeyay si si wax ku ool ah loo daboolo baahiyaha bixiyayaasha u heellan inay la shuraakoobaan UPK si ay ugu adeegaan Boston 3 iyo 4 jir bilaash ah. In kasta oo diiwaangelinta kursiga fasalka BPS iyo kursiga UPK ee barnaamijka beesha ay kala duwan yihiin, barnaamijka, waayo-aragnimada ardayga, taageerada macallinka, iyo waxbaridda ayaa loogu talagalay inay isku mid noqdaan. Magaalada Boston waxay aqoonsan tahay in nidaamyada isdiiwaangelin ee kala duwani ay u abuuri karaan su'aalo badan qoysaska, sidaa darteed magaalada waxaa ka go'an inay horumariso madal isdiiwaangelin midaysan mustaqbalka dhow.